

## Kaarka xilliga firaaqada

Qof kasta oo u dhexeyya 6 ilaa 18 sano wuxuu helayaa 1000 karoон oo kaarka xilliga firaaqada! Kaarka xilliga firaaqadu waa каар hadiyadeed oo aad u adeegsan karto waxqabadyada xilliga firaaqada oo abaabulan.

Lillehammer ayaa noqon doonta degmooyinka lagu tijaabin doono kaarka xilliga firaaqada, arrintas oo aay dowlada qorsheynayso inaay noqoto mid joogto ah. Lillehammer waxay ka mid tahay dowladaha hoose ee tijabin doona sida mashruucan oo kale loo abaabuli karo iyo caqabadaha soo baxo sida lagu xallin karo inta uu mashruuca socdo. Ma garanayno waxa dhici doona tijaabada kadib, laakin waxaan ku faraxsanahay fursada ay carruurta ku nool Lillehammer heleen inta lagu jira muddada tijaabada mashruucan.

Kaarka xilliga firaaqada waxaa loogu talagalay qof kasta oo ka tirsan da'da saxda ah. Waqtiga Ogosto 2021, waxaa ka qayb qaadan karo qof kasta oo dhashay inta u dhexaysa 2003 illaa 2015, kuwaas oo heli karaa 1000 karoон si oo ugu bixiyaan waxqabadyada xilliga firaaqada ee abaabulan. Guga so socdo, qofkasta oo da'ahaan ku habboon wuxuu heli doona kaar kale oo ah 1000 karoон. Haddi barnaamijkaaga ka qaalsan yahay 1000 karoон, kaarka xilliga firaaqada qayb baa iskaga bixinaysa inta kale adiga iska bixinaayo. Lacagtaan looma isticmaali kale qarash nooc kale ah, toosna looma siin karo qoyska, lama keydsan karo kaarka heshay deyrta ilaa gu'ga oo kan kale helaayso. Cunug kasto oo da'da saxda ah wuxuu helayaa kaarkiisa xilliga firaaqada ah ee u gaar ah.

Tag [lillehammer.aktiv-fritid.no](http://lillehammer.aktiv-fritid.no) si aad u aragto waxa aad u isticmaali karto kaarkaaga xilliga firaaqada! Halkasna waxaa ka arki kaarta inta lacag ee ku jirta kaarka firaaqada ee ilmahaga, Marka aad heshid qaansheegad hawl qabad firaquo oo abaabulan, waxaad ku bixin kartaa kaarka xilliga firaaqada, haddii uruku doortay inuu ka qaybqaato mashruuca. Haddii urukaaga ku jirin liiska? Weydii inay la xiriiran [fritidskortet@lillehammer.kommune.no](mailto:fritidskortet@lillehammer.kommune.no) si ay ugu biiraan mashruuca kaarka xilliga firaaqada.

Markii aad isdiiwaangeliso, waa inaad doorataa luqada norwejiga lajhada "bokmål", laakin marka isdiiwaangeliso oo aad gasho, waxaad u wareegi kartaa, lajhada "Nynorsk", ingiriis, Soomaali ama Carabi. Waxa laga yaaba in in bogga lo turjuumi doono luqado badan aakhirka. Waxeda sidoo kale kala dooran kartaa «qoraal buuxo» ama «qoraal fududt», waxaan dooran kartaa inaad aragto astaamo muujinaya waxqabad kasta. Macluumaadka ururrada kala duwan ay ku soo bandhigan barnaamijyadooda weli wuxuu ku qoran yahy af Noorweeji.

Akhriso warbixin dheeraad ah oo ku saabsan mashruuca:  
[www.lillehammer.kommune.no/fritidskortet](http://www.lillehammer.kommune.no/fritidskortet).



LILLEHAMMER  
KOMMUNE